KU DHAQAN XAFIIS D.

# Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 3aad — Muqdisho, 10 Febrayo 1975 — L. 1, R. 2

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA**

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 14, Tr. 13 Febberayo 1975 — *Sharci Canshuur ka dhaafid.* — Bog. 79

## BOGGA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 13 Jenayo 1975, L. 23 — *Awoodda Kormerka iyo baarista maamulka Xoolaha Gargaarka Abaarta.* — » 80

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 20 Jenayo 1975, L. 24 — *Billad Maar ah.* — » 81

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 30 Jenayo 1975, L. 25 — *Kordhin lagu samayey Xeerka Fulinta ee Maxkamadda B. Dalka.* — » 82

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 10 Disembere 1974. L. 26 — *Dhul Dawladeed la siiyay Xaawa Cismaan Faarax.* — » 85

XEER WASAARADDA GANACSIGA, Tr. 3 Febrayo 1975, L. 27 — *Ogolaansho Heshiis dhexmaaray Wakaaladda Horumarinta Xoolaha iyo Shirkadda lagu Magacaabo Hendrikson.* Bog. 86

---

# BOGGA SADDEXAAD

## TALOOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 11 Jenayo 1975, Beddelaad Naado Dhul — *Axmed Rooble Cali iyo Nuur Mahaddale Nuur. (18)* Bog. 88

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 27 Jenayo 1975, Buugga Lacagta L. 4494, Sh. So. 103,70 — *Xuseen Ibrahim. (19)* » 89

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, Tr. 4 Febrayo 1975, Jeegga Wareega L. 0876, Sh. So. 300, uu leeyahay *Jaalle Maxamed Cabdi Saciid. (20)* » 89

---

# BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

SHARCI L.14, Tr. 13 Febberayo 1975.
Sharci Cashuur ka dhaafid.

GUDDOMIYAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO TIXGELINAAYA Goaankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha;

WUXUU SOO SAAREY

Qodobka 1aad

Waxa cashuurta Furdada laga dhaafey alaabta ku qoran lifaaqa «A» oo sharcigan ka mid ah ee lagu isticmaayo dhismaha jidadka magacyadoodu hoose ku dhiganyihiin oo ay someyneyso Dawladda Hoose ee Muqdisho;

1. Jidka Maxamuud Xarbi oo ka billaabmaaya Waddada Jamaal Cabdi Naasir kuna dhammaanaya Waddada Ummadda;
2. Jidka Jaalle Sarreeyo Gaas Maxamed Siyaad Barre oo ka billaabmaya Waddada Jesiira soona dhex maraya Degmada Wadajir;
3. Jidka ka bilaabmaya Villa Baydhabo kuna dhammaanaya Waddada Jaalle Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre.

Qodobka 2aad

Sharcigani wuxuu dhaqangeli doonaa marĕii la saxeexo, waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 13 Febberayo 1975.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

LIFAAQA «A»

| | | |
|---|---|---|
| Naafto | 250.000 | Litir |
| Bansiin | 32.000 | » |
| Gaas | 5.000 | » |
| Saliid | 5.000 | » |
| Graaso | 1.200 | » |

# BOGGA LABAAD

## XEER

**XEER MAXDAWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

**Tr. 13 Jenayo 1975, L. 23.**
**Awoodda Kormeerka iyo baarista maamulka Xoolaha Gargaarka Abaarta.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tan 2aad ee Kacaankii 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO AQOONSADAY Baahida loo qabo in Guddiga Caddaaladda iyo sharciga ee Golha Sare ee Kacaanka loo xilsaaro kormeerka iyo baarista xoolaha loogu tala galay gargaarka abaarta;

ISAGOO TIXGELINAYA Sharcigii 1aad ee soo baxay 6dii disembar 1974, ee lagu dhisay Guddiga Caddaaladda iyo Sharciga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qodobka 1aad

Guddigga Caddaaladda iyo Sharciga ee lagu dhisay Sharciga tirsigsu tahay 1 ee soo baxay 6dii Disembar 1974, waxaa awood loo siiyey inuu kormeero, baaro, markii loo baahdo maamulka xoolaha loogu tala galay gargaarka abaarta.

Qodobka 2aad

Marka uu maamulayo howsha lagu tilmqmay qod. 1 ee xeerkan, Guddiggu wuxuu yeelanayaa awoodda iyo habka shaqada ee lagu xusay qodobada sharciga tirsigiisu yahay 1 ee soo baxay 6dii Disembar 1974.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa islamarka uu saxiixo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 13 Jenayo 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*

**XEER MAXDAWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

**Tr. 20 Jenayo 1975, L. 24.**

**Billad maar ah oo hawikarnimo ee la siiyey Jaalle Adan Maxamed Qaalib oo ah agaasimaha Hawlaha Guud ee Gobolka Shabeelaha Dhexe.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan Labaad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Sharciga Tirsigiisu yahay 65 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1970;

MARKUU ARKAY Sharciga Tirsigiisu yahay 9 soona baxay 28 Jannaayo 1975;

MARKUU EEGAY Hawlihii 1973dii ka hirgalay Gobolka Shabeelaha Dhexe, gaar ahaan Degmada Jowhar, oo lahaa dhismo, horukac iyo kicin ku dhisan caddaalad, sinnaan, wadajir iyo wada shaqayn;

MARKUU QARAWSADAY In Jaalle Adan Maxamed Qaalib oo ah Agaasimaha Hawlaha Guud ee Gobolka Shabeelaha Dhexe uu si kacaannimo iyo xilkasnimo hantiwadaagnimo leh u gutay waajibaadkii ka saarnaa Dalkiisa;

WUXUU GUDDOONMIYEY

Qodobka 1aad

In Jaalle Adan Maxamed Qaalib oo ah Agaasimaha Hawlaha Guud ee Gobolka Shabeelaha Dhexe lagu maamuuso Billad Maar ah oo Hawlkarnimo, laguna siiyo shaqadaas uu habsamida iyo xilkasnimada ugu qabtay Dalka awgeed.

Muqdisho, 20 Jenayo 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

XEER MAXDAWEYNAHA GOLAHA SAER EE KACAANKA

Tr. 20 Jenayo 1975, L. 25.

Kordhin lagu samayey Xeerka Fulinta ee Maxkamadda B: Dalka.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqadda Kowaad iyo Tan Labaad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Sharciga tirsigiisu yahay 16 iyo 54 soo baxay 2dii Maarso 1972;

MARKUU ARKAY Baahida loo qabo in wax lagu kordhiyo Xeerka Funlinta ee Maxkamadda Badbaadada Dalka si uu u noqdo mid hantida Dadweynaha laga xado lgu soo celin karo;

WUXUU GUDDOOMIYEY

Qodobka 1aad

*Wareejinta xoolaha dadka u xiran M.B.D.*

1. Hantida uu leeyahay qof u xiran Maxkamadda Badbaadada Dalka oo loo haysto, dembi ah Xatooyo Xoolo Dadweyne (Peculato) ama dembiyada kale oo ciqaabtoodu tahay DIL iyo hantiguurin (confisca), ma geli karaan wareejin ha ahaato iib ama siismo.

2. Haddii loo baahdo in qayb hantidaas la soo sheegay ah la wareejiyo waa in fasax oggolaasho ah laga helaa Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee M.B.D., laakiin fasaxa noocaas ahi waa in uu yahay mid aan wax u dhimi karin damaanadii daynka iman kara (garanzia del debito eventuale.

Qodobka 2aad

*Heshiisyada ka soo horjeeda sharcigan*

1. Wax alla iyo wixii heshiis kala-wareegsi ah oo la sameeyo taariikhda qofka la xiro ka dib, kana soo horjeeda qodobka kowaad oo xeerkaan waxaa lagu xisaabayaa iyagoo aan jirin oo kale (nulli).

Qodobka 3aad

*Qabashada hantida ninka Qaamaysan oo si' iihayaano iyo*

*raadgadasho ah ugu dhigan qof saddexaad*

1. Garsooraha Fulinta ee Maxkamadda Badbaadada Dalka wuxuu qabanayaa wax allaale iyo wixii hnti ah oo loo garto in lagu gaday lacag uu leeyahay ninka qaamaysani dabadeedna sì raadgadid ah iyo khayaano ah loogu dhigay qof saddexaad.

Qodobka 4aad

*Aqoonsashada hantida si' raadgadasho iyo*

*khayaano ah loogu dhigo qof saddexad*

1. Aqoonsashada hantida uu leeyahay ninka qaamaysani oo sì khayaano iyo raadgadasho ah ugu dhigan qof saddexaad waxaa gaaraya Guddi ka kooban Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo Garsooraha Fulinta iyo Lataliye ka mid ah Lataliyaasha Maxkamadda Badbaadada Dalka, isla Guddigaas baana la noqon kara go'aanka haddii la garto i n uusan dow ku dhisnayn.
2. Qofka saddexaad oo sheeganaya in uu leeyahay Xoolaha ayaa laga doonaya in uu caddeyo in aan xoolahaasu ka imaan xagga ninka qaamaysan.

Qodobka 5aad

*Hantida Dadweynaha oo la siiyey qof saddexaad*

1. Hantida laga lunsaday Dadweynaha waxaa laga soo celinayaa xataa qofka uu siiyo ninka dembiga xatooyada Xoolaha Dadweynaha galay, markii la helo warqado xafiiseed oo sidaas sheegaya ama caddayn kale oo u dhigmata.

2. Qofka qaatay hantidaas waxaa loola dhaqmayaa sidii qof saddexaad oo qaamaysan (Terzo debitore).

Qodobka 6aad

*Dacwadda la xiriirta hantida ninka qaamaysan*

1. Hantida uu leeyahay qof u xiran Maxkamadda Badbaadada Dalka oo loo haysto dembiyadii lagu soo sheegay qodobka Kowaad, ma geli karto wax dacwad ah oo laga furo Maxkamadaha Caadiga ah xarigga ka dib. Laakiin wixii dacwad ah oo horay u dhextiil ninka xiran iyo cid kale oo ka horeysay xarigga loo cuskan maayo qodobkaan.

Qodobka 7aad

*Goorta ninka loo ictibaarayo sidii nin xiran oo kale*

1. Ninka eedeysan waxaa loo ictibaarayaa sidii nin xiran oo kale xataa haddu bannaanka ku joogo xoriyad ku meel gaar ah ama isagoo ka dhuumanaya Sharciga.

## Qodobka 8aad

*Bixinta kharajka fulinta*

1. Waxaa Xfiiska Fulinta ee Maxkamadda Badbaadada Dalka loo siinayaa awood in uu ka bixin karo lacagta loo soo xereeyo Dawladda wixii kharaj ah oo hagaajin iyo maamul ah ee ku baxa xoolaha inta u dhexeysa qabashada iyo xaraashka.

2. Waxaa kale oo Xafiiska Fulinta bixin karaa wixii kharaj ah oo lagu gunaynayo Lataliyaasha Teknikada ah iyo Shaqaalaha ka shaqeeya Xafiiska Fulinta (Personale impiegatizio), iyadoo kharajkaas qiyaastiisa lagala tashanayo Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka.
Kharajkaas waxaa la bixinayaa markay la haboonaato Madaxa Xafiiska Fulinta.

## Qodobka 9aad

*Kordhinta hawsha garsooraha Fulinta ee M.B.D.*

1. Hawsha Garsooraha Fulinta ee Maxkamadda Badbaadada Dalka oo ku tilmaaman Qod. 2aad ee Xeerka tirsigiisu yahay 16 ee soo baxay 2dii Maarso 1972 waxaa lagu kordhiyey inta soo socota:

Garsooraha Fulinta ee Maxdbaadada Dalka wuxxu fulinayaa xukunnada Maxkamadda Badbaadada Dalka qof gaar ugu rido nin sarkaal Dawladeed ah ama ahaan jiray, xukunnadaas oo ka yimid Qod. 242 X.C. oo ah Maamul xumayn xoolo qof gaar ahi leeyahay (malversazione a danno di privati).

## Qodobka 10aad

*Wareejinta hantida uu soo qabto Xofiiska Fulinta*

1. Garsooraha Fulinta ee M.B.D. waxaa awood loo siinayaa in uu hantida la qabto ku wareejin karo Dawladda, iyadoo sideeda ah (trasferimento in natura), haddii uu garto in taasu u faaiido badan tahay danta caamka ah.

2. Hantidaas waxaa lagu wareejinayaa Dawladda markay soo qiimeeyaan Guddi tekniko ah oo aqoon leh, oo uu magacaabayo Garsooraha Fulinta, waxaana loogu wareejinayaa Dawladda qiimaha ay u gartaan Guddigaasu.

Muqdisho, 30 Jenayo 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**
**Tr. 10 Disembere 1974, L. 26.**
**Dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay (Concssione e conseguente libera disponibilità) Jaalle Xaawa Cismaan Faarax.**

## XOGAYAHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Xaashaddii Kowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Qaynuunkii Kowaad ee 21 Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer L. 115 soona baxday 13kii Sett. 1956;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensatay Xaawa Cisman Faarax taarikhdu markay ahayd 24-4-1957 kuna weydiisatay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho — Degmada Wardigley;

ISAGA AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Dawladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, L. 6 soona baxday 1 Juuno 1957, iyadoo aan cidna horstaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda L. 9838, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho — fadhigoodii 209°aad taarikhduna ahayd 31 Agosto 1957;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda L. 5201 taas oo beddeshay midii hore oo lambarkeedu ahaa 9838 laguna aqoonsaday fadhigii 222°aad ee guddiga dhismaha Dowladda Hoose, taarikhdu markay ahayd 23 Maggio 1958, kuna saabsaneed dhismo guri;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada L. 305 ee 25 Lug. 1957 kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Xaawa Cismaan Faarax uu bixisay lacag dhan Shs. So. 3.520, kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 880, loona tiriyay Xaawa Cisman Faarax sida ku cad xaashid ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taarikhdeeduna ahayd 2 Agosto 19757;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

ISAGA OO ARKAY Xaqiijintii Farsamada ka tirsan Waada Dhismaha iyo Dhulka, taarikhdeeduna ahayd 12-11-1974 taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar 5201 ee 6-5-1958 laguna xaqiijiyay sida ay naqshaddu dhiska waafaqsan tahay;

ISAGA OO AKAY Oggolaanta (Nulla Osta) dagganaashada guriga ku dhisan Degmada Wardrigley laguna siiyay xaashida 1.4300 ee 5 Nov. 1974 oo Dowladda Hoose ee Xamar;

ISAGA OO AQOONSAN in la tixgeliyay wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsanaa siismada iyo gacan u gelinta dhulka Dowladda (Concessione e conseguente libera disponibilità) oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis, wuxuu soo saaraya;

XEER

Waxaa dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay, loona aqoonsaday Xaawa Cisman Faarax, dhul ku fadhiya mq. 880, kuna yaal Muqdisho — Degmada Wardigley.

Muqdisho, 10 Disembere 1974.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud
*G. Sare Maxamed Sheekh Cismaan*

*WAA ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 54.*
*Muqdisho, 16 Disembere 1974.*
*Hantidhawraha Guud:*
G. Dhexe CABDILLAHI WARSAME NUUR

---

XEER WASAARADDA GANACSIGA
**Tr. 3 Febrayo 1975, L. 27.**
**Ogolaansho Heshiis dhexmaray Wakaladda Horumarinta Xoolaha iyo Sihrkadda lagu Magacaabo «Hendriksin».**

WASAARADDA GANACSIGA

ISAGOO ARKAY Heshiiskii Deynta Horumarinta (Development Credit Agreement) qodobka VII qaybta 7.01 (e).

ISAGOO ARKAY Heshiiskii Mashruuca (Project Agreement) qodobka 2.03.

ISAGOO ARKAY Heshiiska Deyn Gudbinta (Subsidiary Loan Agreement) qodobka IV, qaybta 4.01 (a).

ISAGOO ARKAY Sharcigii meel marinta heshiisyada kor ku qoran ee lambarkiisu ahaa 21 taariikhdiisuna ahayd 5 Juunyo, 1974 ee ku soo baxay Faafinta Rasmiga ah L. 8, Tr. 1 Agosto, 1974.

ISAGOO AKHRISTAY Heshiiska dhexmaray Wakaaladda Horumarnta Xoolaha Tr. 1-10-1974 ee tilmaamaysay in heshiiska Wakaaladda iyo Shirkadda dheeemaray uu toosan yahay.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qodobka 1aad

In Heshiiska dhexmaray Wakaaladda Horumarinta Xoolaha iyo shirkadda «Hendrikson» bishii Oktoobar 3, 1974 in la ogolaaday, loona aqonaaday inuu ka mid yahay Heshiisyada rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Qodobka 2aad

Xeerkan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 3 Febrayo 1975.

*Jaalle Axmed Maxamed Maxamuud*
Xoghayaha Dawladda Wasaar. Ganacsiga

# BOGGA SADDEXAAD

## TALOOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

---

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*BEDDELAAD NAADA DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Axmed Rooble Cali iyo Nuur Mahaddalle Nuur, maalintii 16-7-1960, loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hodan 4° Km., Jidka Afgoye, uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa Rektangolaar addimihiisuna ahaayeen 76,90x65 kuna fadhiye 5000 mdh., sababtoo a in uu is beddelay qorshihii meeshaas.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa 394468 ee 8-3-61, kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa rektangolaar addimihiisu yihiin 76,50x65 kuna fadhiya 4.972,50 mdh., soohdimihiisuna yihiin sida soo socta:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koofur waxaa ka xiga: Fabbellini Ugo.

Galbeed waxaa ka xiga: Cali Cumar Sheegon.

Bari waxaa ka xiga: Axmed Maxamed.

Muqdisho, 11 Jenayo 1975.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*(18)* *Maxamed Cabdi Saciid*

### MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Garsooruhu hadduu arkay dacwadda kor ku qoran uu tixgaliyey waxa ay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bangiga keydka iyo Ammaahda.

Hadduu ogaaday in hawsha ay ku jirto, awooddiisa: haddu arkay qodobka 69 D. L. 9-9-65 L. 2 wuxuu caddeynayaa. Lumiddii Buugga Lacagta (ammortamento libretto) L. 4494 oo ay ku qorreyd lacag Sh. So. 103,70 ah uuna leeyahay Xuseen Cosoble Ibraahim.

WUXUUNA AMRAYAA

In Xuseen Cosoble Ibraahim loo sameeyo, buug cusub 30 Maalmood ka dib markii amarkaan lagu shaaciyo Faafinta rasmiga ah ee Dawladda, haddii intaas cidina soo caban weydo waana in buu ga cusub gacanta loo galiyo jaallaha kor ku magacaaban ama qof Wakaalad Sharci ah ka sita.

Muqdisho, 27 Jenayo 1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir

(19) *Dr. Yaasiin Shire Faarax*

---

### MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Markaan arkay weydiintii Maxamed Cabdi Saciid;

Markaan Arkay Qod. 69 D. L. 1969 N. 2;

Waxaa cad dhumista Jeegga wareega L. 0876, kuna qoran yahay Sh. So. 300 (sadexboqol) shilin ee Bankiga Kaydsiga iyo Amaahda Laanta 1aad, waxaan idiinka amreynaa in loo cusbooneysiiyo mar labaad Jeegga aan kor ku sheegnay muddo 15 beri oo ka bilaabato amrkii lagu dhigo Faafinta Rasmiga (B.U.) haddaan la helin cid sheegtaa waana in gacanta laga saaro Jaallaha magaciisa la yiraahdo Axmed Xaaji Yuusuf oo joogo Bangiga Keydsiga iyo Amaahda ee Berbera, ama qof sita wakaalad Sharci ah ayadoo la sugayo 15 beri.

Muqdisho, 4 Febrayo 1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka

(20) *Dr. Yaasiin Shire Faarax*

---